# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 44aad Fadhigii 8aad

**Axad 05 December 2020**

**Fadhigu Waxa uu furmey 10:21 AM**

### Gudoomiyaha: - Baashe Maxamed Faarax

**Quraan: -** Md. Obsiiye

**Ajendaha Fadhiga: -**Doodda Wax ka badalka Xeerka Shaqaalaha Rayidka

**Gudoonka: -** Mudanayaal Sidii ay balantu ahayd waxaa maanta inoo bilaabmaya Doodda Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah, waxaan xog-haynta farayaa in u qaybiyaan waraaqa xildhibaanada doodda ka qayb qaadanaya si ay isku qoraan. Waxan ku soo dhaweynayaa;

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan: -** Shir-gudoonka, Xildhibaanada Sharaaafta leh, Saxaafada waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calaykun Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu, inta aanan xeerka gudo galin waxaan kalmad ka odhanayaa dhismaha xeerka ama sida uu u dhisanyahay. Xeerkani gabigiisuba waa 28 page, waxaanu ka koobanyahay 15-Cutub sidee ayay suuro gal u tahay, markaa labadii Page-ba Cutub ayaa laga dhigay ma ogtahay, sida aan ognahayna mawaadiic badan oo isku tahay ayaa waxay noqdaan Cutub lakiin page ama laba page cutub lagama dhigo. Markaa halkaasi waxay u baahan tahay oo hadii xeerka cutubyo loo samaynayo qaab macquul loogu sameeyo.

*waxaanan soo jeedinayaa in Cutubka-1aad uu noqdo Page-ka 1aad ilaa Page-ka 6aad* ciwaanka Cutubkaa oo noqonaya Qodobo Guud waayo waxaa ku jira qodobo isku dhaf ah. **Cutubka 2aad oo aan ciwaan uga dhigay Saacadaha shaqado iyo Fasaxyada** oo ka bilaamaya *Page-ka 7 ilaa Page-ka 13aad,* **Cutubka 3aad** *Page-ka 14aad ilaa Page-ka 23aad* **oo aan ciwaan kiisa ka dhigayo heshiisyada iyo Shaqaalaha, Cubtubka 4aad** waxa uu noqanayaa ama aan soo jeedinayaa in uu noqdo Qodobo isku dhaf ah oo ka bilaabmaya *Page-ka 24aad ilaa Page-ka 29aad. Waxaan soo jeedinayaa in uu xeerku noqdo 4taa Cutub* intaana lagu soo koobo.

Waxaan u gudbayaa erayo kookooban oo ay gudidduna wax-ka soo jeedisay oo ah Xafiiska **Agaasinka shaqada** oo ay gudidduna tidhi **Waaxda Shaqada**, waxaan ka dhigilahaa ama aan soo jeedinlahaa in laga dhigo **Xafiiska Shaqada (labor office)** waayo waa shaqaalihii oo dhan ee maaha waax.

Xuquuqda Shaqo ee Aas-aasiga ah ee muwaadin halkana Gudoomiye waxaa isku qaldan laba arimood oo marka la leeyahay Annual leave iyo leave way kala duwan yihiin oo waa in marka fasax uu qaado qofku la yidhaa waa leave marka uu fasax caadi ah qaatana annual leave la yidhaa.

Xeerkani waa xeer aad u wanaagsan laakiin marka uu tusmada xeerku uu noqdo 8-page wax suuro gal ah maaha ee waa in la soo koobo oo 2-page laga dhigaa ee maaha in uu noqdo xeerka kala badh markaa waxaan soo jeedin lahaa in halkaana dib loogu noqdo intaas ayaan ku soo koobayaa wsc.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf :-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, xeerkani waa xeer aad iyo aad u balaadhan oo mar inaga baxay Madaxweynuhuna Amendment ku soo sameeyay inaguna woxogaa is-beddel ah ku samaynay, waxaana xeer si wanaagsan ugu hadlaya shaqaalaha rayid ka ah oo ilaa marka uu shaqada galayo iyo ilaa marka uu dhamaysanayana si wanaagsan u qoran.

Xeerkana waxaa uu inala yaalay mudo hada ah 8-bilood ah, gudidduna lifaaq ayay soo raacisay ay is tidhi waxaas ayaa u baahan in lagu daro, sidaa daraadeed waxaan guud ahaan xeerka u qaatay sidiisa wixii mudanayaashu ay ka beddelayaan mooyaane.

Gudiddu waxay ka bilawday qodobka 2aad Heshii Muddo Go'an: Waxaa loola jeedaa heshiis shaqo ay wada galeen laba dhinac oo muddo cayiman leh oo ah ugu yaraan hal bil ah *waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa 1-bil ilaa 6-bilood.*

Heshiis Dabo-furan: Waxaa loola jeedaa heshiis shaqo oo aan lahayn waqti cayiman, waa maxay heshiiskaa dabada furan ee aan xad lahayni halkaa waxaan jeclaa in tilmaan la bixiyo, bahalkaa aan xadkaba lahayni waa kee ma muruq-maalkaa waa kee?.

Dhanka kale shaqaalada isaga oo shaqaynaya wax noqda waxaan qabaa in wixii qofkaa shaqaalaha ah soo gaadhay in uu qabo loo shaqeeyuhu hadii aanay insurance ku jirin, markaa waa in taas la cadeeyo waayo dab ayaa qabsan kara, markaa waa in loo shaqeeyuhu uu qabaa dhacdadaa oo lagu daraa.

**Qodobka 11aad** ee lifaaqa gudidda waxaa lagu sheegay in qofka cudurka qaba in aan tuhun la tuhunsanyahay aan shaqada lagaga eryin, waxaan leeyahay arintaa meesha halga saaro oo qofka shaqaalaha ahi waa in uu warqad caafimaadkiisa cadaynaysa la yimaadaa shaqada ee aanu qof xanuunsanayaa aanu meesha ka shaqayn.
**Qodobka 18aad** ee ah dib ugu yeedhida qofka shaqada ku jira, halka waxaa lagu soo qoray oo la yidhi hooyo ku jirta fasaxa dhalmada dib looguma yeedhi karo ilaa inta ay ka

dhamaysanayso fasaxa, *halkaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daro maternity leave-ka oo aha 40 ama lixdan iyada oo waliba xaq u leh in ay ilmaha soo nuujiso, waa in lagu daraa.*

**Qodobka 23aad** Qofka shaqalaaha waxa uu xaq u yeelanayaa 3 cisho oo fasax ah, haddii ay ku yimaaddaan mid ka mid ah xaaladaha hoos ku xusan *Haddii ay geeri ku timaaddo* waa in la cadeeyaa halkaa cidaa ay geeridu ku timid ma hooyadiibaa, ma Xaaskiisaa Ma caruurtiisiibaa waa in halkaa la cadeeyaa.

**Qodobka 10aad** waxaa ku jira khaladaada madbici ah ama xaga higaada ah ee waxaan soo jeedinayaa in aad loogu fiirsado waanan ka baxay wsc.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiye.** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shir-gudoonka iyo Xildhibaanaduba wey salaamanyihiin, Gudiddii soo diyaarisayna wey mahadsanyihiin waayo siwanaagsan oo kooban ayay u soo dhigeen oo kooban wixii ay la noqotay.

Runtii xeerkani iyo xeerkii hore iska waafaqsana waayo wax badan ayaa ka beddelan waayo xeerkani isaga oo ah kaabis iyo wax-ka-beddel waxay ahayd in wixii laga beddelayo uun la keeno, waayo waxaad moodaa in la curiyay xeer cusub ee aanu kaabis iyo wax-ka beddel uun aanu ahayn.

Hadii aan Xeerka ka bilaabo Qaybta gudiddu soo diyaarisay oo aan ka bilaabo **Qodobka 11aad Xuquuqda Shaqo ee Aas-aasiga ah ee Muwaaddinka** 3. Waa ay reebban tahay in qofka shaqaalaha ah lagu faquuqo, shaqada lagaga saaro ama lagaga reebo tuhun ama in uu HIV/AIDS qabo, haddii uu caafimaad ahaan shaqadiisa u gudan karayo *waxaan halkaa ka dhigayaa curuda la noolaan karo hadii uu qobo in shaqada laga eryaa in aanay haboonayn.*

**Qodobka 14aad Shaqada Habeennimo farqada 2aad** waa ay reebban tahay inn carruurtu da'doodu ka yar tahay 15 sanno iyo dumarku in ay habeen ka shaqeeyaan warsahadaha ama goobaha ganacsiga iyo beeraha. *Halkaa in badan ayuu goleheenu ka dooday waxaanan qabaa in da'da laga dhigo 18jir* gudiddana waan ku waafaqsanahay in caruurtu aanay shaqayn oo laga saaro.

Waxaa kale oo aan qabaa in qofka dumar ah ee meherad lihi in ay habeenkii ganacsankaro ee waa in aan xoriyadeeda aan la dabrin ee waa in ay ganacsataa habeenkii marka laga reebo goobaha warshadaha oo aan ka reebayo in aanay ka shaqayn. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in qodobkaa la raaciyo qodob ciqaabeed, marka hadii aad tidhi waan ka reebay caruurta waa in qofkii

shaqaaleeya ciqaabtiisa lagu daraa halkan oo la yidhaa cidii shaqaalaysiisa caruur waa in loo raacaa xeerka habka ciqaabta guud.

**Qodobka 48aad** Gudiddu waxay soo jeediyeen in la aas-aaso gudiddi ka kooban 5xubnood isga oo gudiddaasi tafaasiil faro badan ayuu galay oo ah gudidda dhagaysiga cabashada, shaqaalada iyo loo shaqeeyaha oo taasi hadii ay hirgasho waxay u baahan tahay xidii xubnahaa soo xuli lahayd gudiddaa xeerku muu sheegin Gudiduna kumay soo darin soo jeedin toodan, waayo takaaliif maaliyadeed ayaa ka ratibmaya markaa waa in la cadeeyo ma shaqaalada ayay noqonayaan ma wasaarada arimaha bulshada ayay noqonayaan waa in la cadeeyaa mise waxaa qaabil sanaanaysa hay'ada shaqaalaha taasina ma cada, *waxaan soo jeedinayaa in sidii xeerkii hore u jideeyay waa in loo raacaa.*

Hadii aan u gudbo xeerka Ina horyaala oo la leeyay waxa uu beddelayaa xeerkii hore hadii aan meelaha qaar ka taataabto *waxaa ugu horaysa oo aan soo jeedin lahaa.*

**Qodobka 56aad Qodobka 56aad: Caymiska shaqaalaha** Qofka shaqaalaha ahi haddii uu ku dhinto shaqo isaga oo gudanaya waajibaadka shaqo, waxa magtiisa loo raacaya sida ku cad shareecadda islaamka. *Waxaan soo jeedinayaa in halkaa uu ku ekeedo oo inta danbe laga tiro, waayo inta kale waxaan u arkaa marmarsiiyo ee mar hadii uu shaqadii ku dhex dhintay waan in magtiisii la siiyaa waana mid haboon waana mid cadaaladu ku sugmayso.*

**Qodobka 58aad Is-hortaag sharci.** Waxa uu ka hadlayaa waa cashuur markaa *waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo Is-hortaag Cashuureed, farqada 1aad khaladka ku jira waa in la saxaa. Sidoo kale farqada 2aad waa in laga dhigaa farqada 1aad Ayaan soo jeedinayaa.*

**Qodobka 59aad** hadii hay'ada ama shirkadu beddelato goobteedii shaqo una guurto meel kale oo dalka ah xaquuqdii iyo wixii shaqaaluhu ku lahaayeen way jiraan, markaa waxaan leeyahay ogaysiin Ayaan ka horaysa oo ah in ay shaqaalahaa ka maarantay iyo in kale ah waan in ay ku cadaataa waayo waxa marka horaba ay ka afeef dhigteen ayaaba qalad ah.

**Qodobka 67aad oo sheegaya ka bixida ururweynaha shaqaalaha** Xeerkani waxa uu jideeyay in Ururweyne la shameeyo waana sax waa xaquuq dastuuri ah waana in qolo kasta oo shaqo ka dhaxaysaa ay urur samaystaan, laakiin qodobkani waxa uu u qoran yahay sidii meel marna la iska galayo Marna laga baxayo. Waayo waxa uu halkan ku leeyay in urur walbaa uu ka baxi karo urur weynaha marka uu doono, kalmadaa marka uu doono markii hore waa in uu ka fiirsadaa hadii aanu wixii u yaalay ee shuruuc ahayd hadii aanu ku e kaanayn in uu galaba maaha marka hore, markaa waxaan soo jeedinayaa in ururka ka baxaya urur weynaha uu maraa shuruucda u taala iyo sifaha loo baxayo wixii ay dhigteen oo hal dheeri aha wabilaahi tawlfiiq.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shir-gudoonka iyo Xildhibaanada, Saxaafada dhamaantiin waan idin salaamanyihiin, waxaanan idinku salaamayaa salaanta islaamka AS, xeerkani waa xeer aad u mihiin ah waana in la dhaqan galiyaa, waxaanan aad u raacsanahay sidii ay gudidu xeerka uga soo shaqaysay, kaliya waxaan wax kaga noqonayaa.

**Qodobka 23aad** halka ay ku qoran waxaa la siinayaa fasax hadii ay geeriyi ku timaado waa in la cadeeyaa geeridaa ku timid qofka shaqaalaha ah ma hooyadiibaa ma aabihiibaa ma xaaskiisiibaa ma caruurtiisiibaa waa in la cadeeyaa ayaan soo jeedinayaa, waxa kale oo uu qodobkaasi sheegayaa in la fasixi karo 3maamood ama 7maalmood taasna waxaan soo jeedinayaa in daba furanka laga daayo oo wakhti cayiman loo sameeyaa.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in meesha laga saaro in ay caruuri habeen shaqayso, sidoo kale dumarkuna in ay warshado ka shaqeeyaan ma banaana, hadii anaay ahayn qaybta xafiisyada warshada ee kala duwan waanan ka baxay wsc.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid:-** Bacda salaam, Gudoomiye waxaan ka hadli doonaa soo jeedinta gudidda qodobadaa gudiddu ay wax kasoo jeedisay mooyee inta kale sidoodaan u qaatay.

**Qodobka 11aad** xuquuda shaqaalenimo ee aasasiga ee muwadinka ah **farqada 3aad**, Waa ay reebban tahay in qofka shaqaalaha ah lagu faquuqo, shaqadalagagasaaro, lagaga reebo tuhun ah ama qabo cudurrada keeni kara faquuq, haddii uu caafimaadahaan shaqadiisa u gudan karayo**.** Waxaan soo jeedinayaa in laga soo jeedintaa guddida oo lagu badalo **cudurada aan laga bogsan ee lala noolaan karo hadii uu caafimaad ahaan shaqadisa u gudan karo {sekelment buu helay}.** Waxaan kaloon soo jeedin lahaa oon odhan lahaa xaga dambe halaga raaciyo **iyadoo hadii qofka shaqaalaha ahi qabo cudur halis ah oon laga bogsan karayn laguna kala qaadi karo neefsashada ama is taabashada**.

**Qodobka 23aad** talo soo jeedinta gudiddu ciwaankiisu waa burinta heshiis shaqo, qodobkaa 23aad dhab ahaan tirsigiisu waa 30 ee guddidu 23 ka ku sheegtay tirsigisu waa **qodobka 30aad**.

**Qodobka 31aad** nuqulada heshiiska erayga Agaasinka ee guddidu ay u badashay waaxda, waxaan soo jeedinayaa maadaama agaasinkaa laga hadlayaa uu yahay xafiiskii shaqaalaha ee aan ahayn waaxihii caadiga ahaa waxaan odhan lahaa haloo daayo magaceedaa hore ee Agaasinka.

**Qodobka 32aad** Shuruudaha iyo Waqtiga Farsamo Baradka xukuumadu siday ku keentay waxay ahayd sanad ilaa 3 sano guddiduna waxay kusoo koobtay 6 bilood, farsamooyin

baa jiri kara aan 6 bilood lagu baran Karin oo in ka badan lagu baran karo, markaa waxaan soo jeedinayaa **in ugu yaraan sanad laga dhigo** {**sekelement buu helay**}.

**Qodobka 35aad** qaabka shaqo qorista shaqalaha. Guddidaa waxaan soo jeedin lahaa xeerku marak hore wuxuu ku imid laba xubnood oo uu soo dirto loo shaqeeyuhu iyo xubin wasaarada agaasinkaa ka timaada 3 daa xubnood imtaxaanka qaadaan, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **hal qof oo ka socda loo shaqeeyaha iyo hal qof oo ka socda agaasinka shaqaalaha gobolka iyo hal qof oo ka socda ururada shaqaalaha hadii aanu lahayn urur shaqaalena uu noqdo qof uu shaqaalaha hayadaasi uu soo diro**, hadaan ururadii shaqaalaha iyo shaqaalaha aan awooda la siin ee xukuumada loo badiyo shaqo qoristu waxay isaga badanaysaa sidii shaqaalaha dawlada oo kale.

**Qodobka 48aad** guddida dhagaysiga cabashada shaqaalaha halkaa wax badan baan ka badalay oo waxaan idhi 5 tii xubnood baan u daayoo isuduwaha wasaarada iyo xubin kale oo ka mida shaqaalaha wasaarada ee gobolka oo wasiirku soo magacaabo marka uu helo soo jeedinta isu duwaha labadaas waa dhinaca dawalada hal xubin oo shaqaalaha gobolku usoo xushaan ka mid ahaanshaha guddida hadiii ay urur leeyihiin hasoo hadiraan hadii kalena intay sanadkii shiraan ama intaa guddidu shaqaynayso hasoo cayintaan xubin u matasha, hal sharci yaqaan oo ah sharci yaqaanada aan xukuumada u shaqayn iyo hal xubin oo ururada aan dawliga ahayn usoo xushaan ka mid ahaanshaha guddida. Halkaana shantaa xubnood baan u qaybiyay.

**Qodobka 64aad ilaa 67aad** ee ka hadlaya dhismaha ururada shaqaalaha ee guddidu ay soo jeedisay in xeer nidaamiye lagu soo saaro. Xeer nidaamiye kastaa wuxuu ka shidaal qaataa xeerka halkan waa 4 qodob oo qudha waa 64, 65, 66 iyo 67, afartaa qodob waxay noqon karayaan xeer nidaamiyuhu halkuu ka shidaal qaadanayay oo afartaa qodob ma wada koobi karaan ururadii shaqaalaha iyo sidii loo samaynayay xukuumadaana soo jeedisay afartaa qodob markaa sabab aynu inagu uga tuurno markaa waxaan leeyahay anuu afartaa qodob aynu hagaajinoo hana noqdaan hagistii lagu hagaayay ururada shaqaalaha.

**Intaas waxaan kaga baxay talo soo jeedintii guddida.** Shan bayj oo tusmo ah baa ku qoran tusmaduna page number bay tilmaamaysaa waxaan odhan lahaa markaa halkaa hawl baa ku maqane dib haloogu noqdoo hala page numberiyo si tusmadu ay u shaqayso, hadii kale tusmo waxba tari mayso.

Magaca xeerka, magacii xeerka waxaa loo badalay sida inta badanba inoo timaada, marka uu wax kabadalku inoo imaadana xeerka waxaa lagu magacaabaa wax ka badalka iyo kaabista xeer hebel, intaa kaabista iyo wax ka badalkana xeerkiibaa dib loogu noqonayaa markaa waxaan odhanayaa sidaan marar badan oo hore soo jeediyay magaca xeerku ha

noqodo **xeerka shaqaalaha rayidka ah ee wax kabadalka iyo kaabista lagu sameeyey Xeer Lr. 31/202.** Eray bixinta waxaan soo jeedinayaa halugu kordhiyo **wasaarada** u xil saaran, **wasaarada oo loola jeedo Wasaarada ku shaqada leh arrimaha shaqaalaha rayidka.**

**Qodobka 14aad farqada 3aad** oo u dhignayd Dadka naafada ah ee habeenkii shaqeeya, waa in ay helaan adeegyada ku haboon ee ay ku gudankaraan shaqadooda**.** Maan fahin farqadaa adeegaa habeenkii lasoo kordhhinayo ee bal hadii ay jirto cid fahantay intaynaan ansixin hala fasiro.

**Qodobka 16aad** ee Fasaxa qaran, Sanad walba waxaa uu qofka shaqaalaha ahi leeyahey isugeyn 12 maalmood oo fasaxyada qaranka ah (public holidays), oo qofka shaqaalaha ahi uuqaadanayoboqolkiibaboqol (100%) mushaharkiisa, hadii uu shaqeeyo.

Public holidays marka aanu shaqayn ayuu mushaharkiisa leeyahay 100% laakiin marka uu shaqeeyo public holidays ka wuxuu yeelanayaa overtime, markaa waxaa halkaa khaldan inta halka dame laga raaciyay ee hadii uu shaqeeyo, **hadaanu shaqayn** bayna ahayd, markaa waxaan soo jeedinayaa in Qodobkaas 16aad sidan laga dhigo sidan **"Sanad walba waxaa uu qofka shaqaalaha ahi leeyahey isugeyn 12 maalmood oo fasaxyada qaranka ah (public holidays), oo qofka shaqaalaha ahi uu qaadanayo mushaharkiisa boqolkiiba boqol (100%) isagoo shaqada ka nasray, hadii uu shaqeeyana loo xisaabinayo shaqo dheeraada oo uu ku qaato lacag dheeraada. sida lagu jideeyey farqada 4aad ee qodobka 13aad ee xeerkan".**

**Qodobka 19aad** ee Fasaxa Dhalmada, waxaan soo jeedinayaa in ciwaankaa aynu ku badalno **Fasaxa Umusha** waayo xooluhu way dhalaan dumarkuna way umulaan.

**Qodobka 20aad** Hooyada Nuujinaysa ilmo ee shaqeysa, halka waxaan soo jeedinayaa in cinwaanka laga dhigo **Fasaxa Nuujinta,** waxa kale oo aan soo jeedinayaa in loo qoro Qodobkaa sidan **"hooyo shaqaaale oo oo nuujinaysa ilmaheeda waxay maalin walba yeelanaysa fasax nuujineed oo dhan hal saac oo dheeraadka ah 30 daqiiqo ee nasasho maalmeedka lagu jideeyay farqada 4aad ee Qodobka 15aad, fasaxaas oo isugeyntiisu yahay 11:00 AM ilaa 12:30 AM".**

**Qodobka 26aad F/1aad** waxaan farqadaas xaga dambe ka raaacinayaa **"iyo wixii xuquuq kale ugu hadhsanaa loo soo shaqeeyaha sida maalmo fasax sanadeed uu shaqeeyay ama fasax qaraneed ama saacado dheeraada oo uu shaqeeyay oo loo diray oo lagu siinayo si waafaqsan farqada 4aad ee Qodobka 13aad"** waayo waxa laga yaabaa inuu xuquuq kale oo aan la siin lahaa sida fasaxyo uu shaqeeyay oo xuquuqdoodii la siin, ama maalmo shaqo qarana inuu shaqeeyay oo maalmo kale loogu badalay aan lacagna lagu siin.

**Qodobka 28aad** waxa ku jirta kalmad ingriisi ah oo si khaldan loo qoray oo **Qodobkan iyo Qodobka 29aad** si khaldan loo qoray taas oo ah **(propotion)** marka propotion maahe waa **(propation),** marka heshiis maahe waa mudo shaqo oo qofka lagu eegayo in akhlaaqdiisa iyo hab-dhaqankiisu wanaagsan yahay oo saddexda bilood hore inta badan ah, marka heshiis kasta way la socon kartaey maaha heshiis shaqaalenimo oo sideeda u taagan, heshiiskana farqado ka mid ah lagu cayimi karo.

**Qodobka 30aad F/6aad** inta ah ku xusan xaalada qodobka 47aad, halkaasi maaha qodobka 47aad ee Qodobka 46aad, marka halkaana ha la saxo.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdule** **"28min 26sec"** ASC, salaam ka dib, Mudane Gudoomiye marka hore waxaan soo jeedinayaa wax ka badal buu xeerkani inoogu yimi, haduu inoogu yimi siday u soo gudbiyeen mudo hore ayaynu ansixinay Xeerkano ahayd 2017kii, xeerkii oo dhamaystiran maanu hayn xeerkan Madaxweynuhu soo gudbiyayna kuma cada qodobada la badalay iyo sida loo badalay iyo sababta loo badalay, sidaas bayna xeerarku inoogu iman jireen, marka xeerkani gabi ahaan wuxuu noqday xeer cusub.

Hadaan u galo Xeerka, anigu intaan soo akhriyay iyo sidaan u soo sababeeyay waan ka hadlayaa.

**Qodobka 3aad F/2aad Xaraafka (d)** oo ah **"Shaqaalaha muruqmaalka ee maalinlaha ah"** marka shaqaalaha muruqmaalka ahi xuquuq bay leeyiin, waana in xeerkan lagu soo daraa sidii iyagana xuquuqdooda loo ilaalin lahaa, xeerkan waxa ku qoran oo aad moodaa inuu iska hor-imanayo marna saddex bilood laga dhigay marna bil laga dhigay, marna sanad, marka waxaan soo jeedinayaa inkasto shaqaalenimadeedu sanad gaadho in marka la qaadanayo heshiis lala galo, wixii intaas ka soo hadha ee muruq-maal maaline leh ah in xuquuqdooda aynu meel saarno oo xeerkan lagu daro, oo aynu nidhaahno marka la qaadanayo ugu yaraan waa in ciddi la ogaataa, loo shaqeeyaha laftiguusu xuquuq buu leeyahaye in tiisana la ilaaliyo.

Gudidda waxaan ku raacsanahay in halka ***"agaasinka"*** laga dhigay loo badalo ***"waax"*** oo ah waax wasaarada u qaabilsan shaqadaas.

**Qodobka 5aad F/2aad Xaarafka (b)** oo ah **"Afar (4) xubnood oo sharci yaqaano ah oo ugu yaraan labo ay haween yihiin",** umada reer Somaliland xuquuq siman bay leeyihiin, maaha inaynu sharci ka dhigno in laba dumar noqdaan ama laba rag noqdaan oo inagu u kala saarno intaynu xeerka ku qorno, marka waa isku xuquuq ee waxaan soo jeedinayaa in laga saaroa ugu inta dambe eeah ugu yaraan laboay haween yihiin, oo aynu u dayno **"Afar (4) xubnood oo sharci yaqaano**".

**Qodobka 7aad F/1aad** waxa ka dhiman xarafka **"la"** marka xarafkaas ha lagu daro si ay u noqoto **"la xidhiidha"**

**Qodobka 11aad F/3aad** oo ah *"Waa ay reebantahay in qofka Shaqaalaha ah lagu faquuqo, Shaqada lagaga saaro ama lagaga reebo tuhun ama inuu HIV/AIDS qabo, haddii uu Caafimaad ahaan Shaqadiisa u gudan karayo"* taas waxaan leeyahay waa in loo badalo **"waa in qofka shaqada laga faquuqin isagoo caafimaad ahaan u gudan kara"**

**Qodobka 12aad** waxaan ku daray farqad cusub oo **6aad** taas oo ah sidan **"saacadaha shaqada hadii ay soo gasho salaadu waa in la tukado heshiiskana waa inay ku jirto"** waayo, hadaad xasuusataaad waxa bari dhexdaa maqlayay dad muslima oo reer Somaliland ah hay'addii ay u shaqaynayeen ay salaadii u diiday oo tidhi heshiiska kuma jirin, marka waa in xeerka sidaa loogu daraa oo heshiiskana ku jirta.

**Qodobka 13aad F/4aad** Xarafaha (d) halka ay ku qoran tahay in laba iyo badh lagu dhufto, waxaan ka dhigay **in laba lagu dhufto qiimaha mushaharka saacadii caadiga ahayd ee shaqo.**

**Qodobka 14aad F/2aad** oo odhanaysa **"Waa ay reebantahey in caruurta da'doodu ka yartahay15 sanno iyo dumarku inay habeen ka shaqeeyaan Warshadaha ama goobaha ganacsiga iyo Beeraha"** halka waxaan odhan lahaa 15 jirka ha laga saaro, xeerkana meelo badan bay ku qoran tahay in qofka 15 jira aan shaqo la qori Karin, sidoo kale dumarka iyagana aan ka saarno waayo shaqada xuquuqdeeda dumar iyo rag waa loo siman yahay, habeen iyo maalin kay doonto ha shaqeeyaane.

**Qodobka 14aad F/3aad** ee ah *"Dadka naafada ah ee habeenki*i shaqeeya, waa in ay helaan adeegyada ku haboon ee ay ku gudan karaan shaqadooda" anigu waxan u badalay oo waxaan u badalay in dadkoo dhan laga dhigo noocuu doono ha noqdee, waxaana soo jeedinayaa in sidan laga dhigo **"dadka shaqaalaha waa inay helaan adeegyada ay uga baahan yihiin shaqada ay qabanayaan"**

**Qodobka 17aad** waxaan ku daray farqada cusub oo noqonaysaa **F/3aad** taas oo ah sidan "qofka shaqaalaha ahi fasixiisa sanadlaha ah wuxuu ku badalan karaa mushahar hadii sidaas uu ka ogolaado loo shaqeeyuhu" ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 19aad F/3aad** oo ah *"Hooyada ku dhicisa uur 3 bilood ilaa 5 bilood ah waxay xaq u leedahay fasax dhan 30 cisho oo fasax dhalmo ah oo ka dambaysa mudada dhiciska, marka uu sidaa caddeeyo dhakhtar la aqoonsan yahay"* markaa anigu halkaas 30 cisho ah waxaan soo jeedinayaa in **"40 cisho"** laga dhigo.

**Qodobka 22aad F/3aad** waa in si loo cadeeyo lagu sii daro **Xaarafka (c)** oo noqonaysaa **"Hadii uu ku naafoobo ama ku dhinto waa inuu helo xaqiisii, isagoo ku leh xaqiisa loo shaqeeyaha.**

**Qodobka 23aad** waxaan soo jeedinayaa in arrimaha qodobkani ka hadlayo lagu cadeeyo heshiiska shaqo galista shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhu galyaan, waayo hadhaw muran baa ka iman karaa isna xeerku eegayaa oo raacaya, loo shaqeeyuhuna heshiisku eegayaa, marka waa inay heshiis noqotaa. Hadii uu aqalgayo waa inuu helaa **mudo 7 cisho ah.**

**Qodobka 26aad** farqad cusub oo noqonaysaa **F/4aad,** farqadaas oo sheegaya dambiyada hadii uu galo uu xuquuqda ku wayayo in heshiiska ay ku cadaadaan, waxaana u dhigay sidan **"waa inay heshiiska ku cadaato dambiyada aan xuquu lahayn shaqaaluhu".**

**Qodobka 27aad** qodobkaas xadidaada lagu xadiday hal bil mushaharkeed anigu meesha waan ka saarayaa, waxaana soo jeedinayaa in laga **dhigo "waa inuu bixiyo kharashka aaska"** waa kharashka aasku bilna wuu ka badan karaa wuuna ka yaraan karaa, markaa in kharashka aaska uun loo daayo oo xadidaada ha laga daayo.

**Qodobka 28aad F/3aad oo odhanaysa** *"Haddii uu dhammaado muddadii heshiisku bil ama ka badan wuu soconaya heshiisku"* anigu farqadaas aad uma fahmin, marka sidii farqadaas loo fahmi lahaa waa in la cadeeyo.

**Qodobka 30aad F/8aad** oo ku qoran tahay *"Faqradda 4,5,6,7 ee Qodobkan dhinacyaddu waxay heshiiska ugu bixi karaan ogaysiin la'aan"* halkaasi ma cada, anigu waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhu kii heshiiska ka baxaya waa inuu qoraal ugu gudbiyo dhinaca kale"** ogaysiin la'aan buu ka baxayaa dee macquul maaha baan qabaa.

**Qodobka 31aad** halka ah *inuu u gudbiyo xafiiska agaasimaha shaqada*, waxaan soo jeedin lahaa in halka la badalo waayo hadii heshiiska lagu galay Ceergaabo, dee qofka halka u jooga Wasaarada inuu u gudbiyo, laakiin maaha inuu ilaa halka Hargeysa yimaado. Marka waa in loo badalaa **"hadii heshiiska lagu galay gobol waa inuu cidda wasaarada wakiilka uga ah Gobolka u gudbiyaa"**

**Qodobka 32aad F/2aad** halka ah *waa inaanu ka badnaan 1 sano ilaa 3 sano* anigu waan badalay oo waxaan ka dhigay sidan **"wakhtiga farsamo baradku waa in aanay ka badnaan hal sanno"** oo aan soo jeedinayaa.

Gudoomiye, Xeerkani aad iyo aad buu muhiim u yahay, waxaan aragnay dad tusaale ahaan tacadi ku dhacay sida kuwa macdanta ka qodaya buuraha ee shirkadaha ajnabiga ah la shaqaynayaa wax alaale wax heshiis ah oo lala galay oo saxeexeen ma jiro, markii aanu u kuurgalnay waxaa naloo sheegay inuu jiro qoraal loo shaqeeyaha kaliya wax u waajibinaya laakiin shaqaalaha aan wax alaale wuxuu u waajibnayaa jirin, sidaa darteed, dadka muwaadiniinta ah ee reer Somaliland ajnabiga u shaqaynaya ama shirkadaha u

shaqaynaya waa in xuquuqdooda meel la saaro oo aynu Xeerkan ku cadayno, sharcigana waa inaynaan ku deg-degine ka baaraan degnaa, si fududna aynana u gudbin.

Waxaan soo jeedinayaa in xeerka si wanaagsan loo wada akhriyo, anigu inta dambe oo dhan ma akhrin, waxaan rajaynayaa in xildhibaanada kale soo akhrin doonaan. Waxa kale oo waxyaabaha naloo sheegay ka mid ah, dad inta tacadi loo gaystay cidii u gaysatay halkii qofka muwaadinka ah wax loo qaban lahaa ee isaga xuquuqdiisii la ilaalin loo dooni lahaa in iyagii la xidh-xidhay, dadka caynkaas oo kale sameynaya waa in xeerka lagu cadeeyaa.

Waxa kale oo dhacday, gabadh umushay, xeerkuna wuxuu cadaynayaa mudo ay fasax tahay, waxa lagu yidhi maalintii kowaad soo shaqo tag, waxay tidhi ilamaha miyaan soo qaata, waxa lagu yidhi maye ilmaha ha keenin meesha ee ka kaalay, ugu yaraan sideed saacadood ku dhowad bay shaqaynayaa oo ilmihii ka maqnaanaysaa, marka shaqaalaha tacdiyo noocaas ah baa haysta.

Marka waxaan Xildhibaanada u soo jeedinayaa inaynu xeerkan xil iska saaarno, waana in aad loo cadeeyo, in badan oo wanaagsan way ku jiraan, marka aad iyo aad xeerkan aynu uga fiirsano, WSC.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, marka hore waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay ee sheegay in aanu xeerkii hore ee 2004-kii baxay aanu halkan ku cadayn, iyo wareegtada madaxweynaha qodobada wax lagaga beddelay iyo sidoo kale baahida keentay in xeerkan wax ka beddel lagu sameeyo, waayo macne wayn ayay ku fadhidaa.

Waxaa kale oo aan sheegayaa in qaab qoraalka xeerkani uu qaladaadku ku badden yahay unna baahan proofreading rasmi ah lagu sameeyo waayo waxni waa xeer oo hadii eray yari is beddelo macnaha oo dhami wuu is beddelayaa.

**Qodobka 3aad** waxaa uu leeyahay sharcigan lagu dhaqi maayo shaqaalaha dawlada, ciidamada, ciyaartoyga iyo Muruq-maalka maalin laha ah, markaa su'aasha isweydiinta mudani waxa weeyi shaqaalaha Muruq-maalka ah ma xeer gaar ah ayaa loo samaynayaa, wakhtiyada ay shaqeeyaana waxaa kamid ah qaar ayaa dhisme weyn oo dabaq ah muda 9bilood ah ka shaqeeya, waxaana dhacda in dhismayaasha qaar ku dumaan oo qaar ku dhaawacmaan ama ku dhintaan *sidaa awgeed anigu dan uma arko in xeerku uu meesha ka saaro shaqaalaha murug-maalka ah meesha gabi ahaanba, markaa hadii aan xeer gaar ah loo samaynayn waa in aynu xeerkan ku qeexnaa xuquuqo ay leeyihiin, (1 taageero ah ayuu helay).*

Waxaa kale oo jirta marka aan eegto **Qodobka 4aad** waxaa la xaqiijinayaa in la ilaaliyo daryeelka iyo bed-qabka shaqada, halkaa oo aan u fahmay bad-qabka shaqada in uu yahay safety-gii tusaale ahaan meesha uu shaqaaluhu ka shaqaynayo waa in la ilaaliyaa

bed-qabka shaqaalaha oo hadii uu ka shaqaynayo meel plastic ah oo hadii meel u dhaw siqaar lagu cabo gunada karta, markaa waa in Xeerka lagu daraa in a meesha uu ka shaqaynayaa ay bad-qabkeeda leedahay.

Waxaa kale oo cutubka 2aad ku jira waxaa xeerka lagu aas-aasayaa agaasinka shaqada oo hoos yimaado wasaarada shaqada iyo arimaha bulshada, *halkaa waan ka saarayaa oo waxaan soo jeedinayaa in uu line-minister uu noqdo oo wixii sii odhan leh.*

Agaasinka xafiiska shaqaduna waxaan *soo jeedinayaa in uu agaasin Guud uu noqdo, sidoo kale halkaa afarta xubnood ee alaba haweenka yihiin waxaan ka saaray haweenka waayo waxaan leeyahay yaan qofka loo eegin cida uu yahay hadii kale waxay noqonaysaa contradiction ee waan ka saarayaa farqadaa.*

**Qodobka 7aad farqadiisa 2aad** waxay leedahay In ay ka dalbadaan dhinacyada dacwada inay keenaan maragyo si loo dhagayso marka dacawada la qaadayo. *Waxaan leeyahay wax ay dalbanayaan waa maxay? Waa in ay cadahay waxa ay dalbanayaan. Farqada 4aad* in ay dhaariyaan dhinacayada ama cidkasta oo ay khusayso *sidii ayay u dhaarinayaan waan ay cadahay iyaduna.*

Cutubka 3aad waxa uu ku kala saarayaa saacada shaqada, sidaa awgeed waxaan leeyahay saacada shaqadu waa 8saacadood hadii aanay jirin waxkhti dheeraad ah oo uu lacag ku qaadanayo waana in uu wakhti xadidan ahaado oo aan maalmo loo eegin ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 14aad, Shaqada habeenimo** Shaqada habeenimo waa shaqada la qabto inta u dhexaysa 10:00pm ilaa 6:00 am. *Anigu waan ka saarayaa taas oo waxaan ku beddelayaa in laga dhigo 6aroornimo ilaa 6-da Subaxnimo oo shifts loo sameeyo Ayaan soo jeedinayaa.*
Hay'adaha ajaanibka ah iyo shirkada aan heshiisyada la galnay waxaan soo jeedinayaa in ay ku dhaqmaan xeerarka inoo yaala ee aanay ku dhaqmin xeerarka ay meelahaa kala yimaadaan, sidoo kale heshiisyada ay galayaan waan in uu ku salaysanyahay xeerarka dalka, waana in heshiiska shaqaaluhu galaana waa in uu xafiiska shaqaalaha wasaarada uu yaalaa.

Qodobka kale ee aan xusayo waxaa ka mid ah in xeerka laga reebay wixii da'ahaan 15 iyo ka yar in shaqada laga reebay, da'daa oo inaga ah da'da qaan-gaadhka ah oo shareecadeenu ay sheegtay waan shaqaalada aan laga reebin oo lagu daraa wsc.

**Cawad Cali Maxamed** — **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada**

--------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle** — **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**

------------------------------------------